

Adeegyada Booliiska Edmonton qaybta qaabilsan dambiilayaasha/dembiyada ka dhaca gudaha/ guryaha (The Edmonton Police Service Domestic Offender Crimes Section) waxaa ka go'an inay bixiso adeegyo baaritaan iyo xalineed ee kiisaska khaaska ah ee lasoo ogaadey in dhibanuhu uu khatar ugu jiro inuu lakulmo dhibaato gacan kahadal ama denbiilaha loo arko inuu markale dhib geysan karo.

Adeegyada ay qabato xaruntu waxaa kamid ah, baaritaan dheeri ah oo lagu sameeyo kiisaska culculus, ama arimaha aan lagu soo ogaanin faylashii hore, in lala diyaariyo dhibanaha qorshe is badbaadineed oo dhameestiran iyo in si firfircoon loola shaqeeyo dhibanaha iyo heyadaha qaabilsan arimaha bulshada si loo gaaro arimahaan:

- in lasoo afjaro dhibka dhacay/ qalalaasaha;
- in dhinacyada kulugta leh ay sameeyaan isbadal nololeed ee ku haboon;
- in lala shaqeeyo xubnaha arimahan roondeeya/ilaaliya (Patrol members) si ay u diyaariyaan jawaabta ku haboon kiisaska gacankahadal/qalalaase ee ka dhaca guryaha.

Amaankaagu Waa Inoo Muhiim

Usamee qorshe aad isku badbaadisaan adiga iyo caruurtaada adigoo la hadlaysid ama kaashanaysid dadka qaabilsan, sida shaqaalaha meelaha hoyga dadka laga siiyo (Shelter Staff), kuwa bixiya adeegyada dhibanaha (Victim's services), xarumaha heyadaha bulshada ee qaabilsan qalalaasaha ka dhaca qoysaska (Community Family Violence Centre) iyo Booliskaba.

Hubi in ilmahaagu ay qeyb kayihiin diyaarinta qorshaha is badbaadinta sida meelaha aad ku kulmi kartaan hadii dhib dhoco, meelaha lagu dhuuman karo, wadooyinka lagu baxsan karo, erayo aad isla fahmaysaan(code words), iwm. Bar ilmaha sida loo waco 911, sii addresska guriga, iyo sida khadka taleefanka loo furo.

Waxaa sido kale kaqeygelinkartaa (saaxiibadaada, qoyska, deriska iyo dadka aad isla shaqeysan) si ay kuu caawiyaan ama ay meel amaan ah kuugu keydiyaan waxyaabahaad isku badbaadin laheed (sida lacagta, dharka, talefanka, furayaasha, kaarka aqoonsiga) hadii ay dhacdo xaalad degdeg ah.

Rabshadu/Gacankahadalku Waa Denbi

Waxay ka hor imaanaysaa sharciga inuu qofi weeraro qof kale xiriirkeydoonaaba hakala dhaxeeyo. Gacankahadalka ka dhex dhaca qoysaska waxay qaar kamida ahaan karaan ama wada noqon karaa dhaqamadaan soo socda:

- Xadgudub jirdil ah
- Xadgudub dhaawaca qofka dareen ahaa iyo maskaxiyan ahaan
- Dhibaateyn/ dabagal
- Xadgudub galmo ama
- Handadaad lagu dhibaateynayo adiga, ilmahaada, qoyskaada, xayawaanka rabaayadaada ah ama hantidaada
- Xadgudub dhaqaale

Keligaa Matihid

Ma mudnid in lagugu xadgudbo, wax qaladana kuma lihid adigu, masuul kama tihid ficilada ay sameeyaan dad kale.

Booliiska iyo warbixinada adeegyada bulsho ee bogaan ku xusan waxay kaa caawin karaan inaad hesho caawimaad, jiheyn iyo taageero.

Hadii aad badashay adareeska gurigaaga , hubi inaad la socodsiiso booliiska si ay kaagala soo xariiran arimaha quseeyo waqtiyada maxkamada.

Hoos waxaad kahelysaa warbixino dheeri ah iyo macluumaad muhiim ah hadii aad ay ku heysato xadgudubyada/gacankahadalka guryaha kadhaca oo soo noqnoqday.

Taleefanada aad u baahantahay inaad ogaatid

911: Wac 911 haday jirto xaalad noloshaada qatar gelinaysa iyo denbi markaas gacanta lagula jiro.

Xaalada aan degdega ahayn (EPS Non-Emergency) : Garaac nambarkan 780-423-4567 ama #377 (#377 wuxuu ka shaqeeynaa magaalada Edmonton bes)

Taleefanka Warbixinada Rabshadaha/gacankahadalka Qoysaska Ka

Dhexdhaca: Wac 780-310-1818 si aad u hesho caawimaad si qarsoodi ah oo aad ku heleyso inkabada170 luuqadood.

Haduu dhib ku heysto: wac 780-482-HELP (4357) hadii aad dareemaysid inay dhibaato kaa tan badatay, xadgududb lagugu haayo ama aad ku fikirraysid inaad naftaada dhib gaarsiisid/nafta isdhaafisid.

211: Wac 211 hadii aad u baahantahay waxaad cuntid, meel aad ku hoyatid/seexatid, ama aad daneyneyso qofaad la hadashid.

811: Wac 811 si aad u hesho talo caafimaad oo ah mid 24 saac 7da beriba shaqeeya.

Kooxda Latacaalida Dhibaatooyinka (Crisis Response Team), (Caafimaadka Maskaxda):Wac taleefanka aad ka heleysid caawimaada 780-424-2424 oo ah mid 24/7 shaqeeya. Hadii aad danyaysid inaa hesho warbixino dheeri ah, barnaamijyo iyo caawimaadba, fadlan booqo boga interneetka ay ku leedahay hay'ada caafimaadka ee gobolka Alberta [Addiction and Mental Health web page](#).

Waxa Aad Filankarto Marka Aad Wacdo Booliiska

Markaa Wacdid 911

- Waxaa lasoo dirayaa booliis inta aad qadka 911 ugu jirtid qofka kula hadlaaya ama haduusan kujirinba.
- Qofka kula hadlaya ee qiimeynaya xaalada waxa uu isku dayayaa inuu kula hadlo si uu u aruuriyo warbixino haday macquultahay.
- Booliiska ayaa imaanaya si uu u qiimeeyo dhacdada/xaalada.
- Waxaa dhici karta caqabad/isfaham daro xaga luuqada ah.
- Markii lahubasado in xaaladu amaantahay, waxaa la codsankaraa in la isku dayo in turjumaan lahel.
- Booliisku wuu wareysanayaa, hadalana ka qorayaa qofka soo dacwooday (Dhibanaha), Markhaatiyaasha iyo Eedeysanaha.
- Waxaa la qiimeynayaa dhibka/dhaawaca soo gaaray dhibanaha.
- In la aruuriyo cadaymo si go,aan looga gaaro in la xiro eedayanaha (sida in sawiro laga qaado dhaawaca ama dhibka dhacay).
- In la sameeyo qorshe badbaadin ah dhibanaha, hadii loo arko daruuri.
- Booliiska wuxuu soo saarayaa eedeyn haday cadaato in denbi weerar la geystay.
- Baaritaanada la xariira gacankahadalka ka dhex dhaca lamaanayaashad ama dadka xiriirku ka dhaxeeyo , Booliiska ayaa go,aaminaya waxa lagu xukumayo, hadii uu soodacwooduhu rabo iyo hadii kalaba.
- Xukunka eedeymaha waxaa lagu go,aaminayaa cadaymaha ay soo aruurshaan Booliiska.

- Booliisku maaha dhexdhexaadiyayaal.

Marka aad wacdid Taleefanka aan xaalada degdega aheen ee Booliiska Edmonton waxaa dhacaya:

- Inaa la hadashid qof wax qiimeeya oo ku weydiin doono suaal si loo helo warbiixin ah sababta loogu baahanyahay Booliis. Qofka aad la hadlaysid way dhici kartaa inuu yaqaan ama uusan aqoonin luuqadaada ama lahjadaada.
- Booliiska ayaa imaan doona
- Booliisku wuxuu raaci doonaa talaabooyinka u dagsan markay dhacaan xaaladaha degdega ah

Amarka Ilaalinta/badbaadinta Degdega Ah (Emergency Protection Orders, EPOs) looguna talagalay kahortaga rabshadaha ka dhexdhaca dadka xiriirku ka dhexeeyo ama lamaanaha ah (EPS for Intimate Partner Violence)

Amarka Ilaalinta/badbaadada Degdega Ah (Emergency Protection Order, EPOs) waxaa la heli karaa marka ay qalalaase/gacankahadal, dhibaateyn ama dhaqan handadaad ah ay ka dhex dhacdo xubnaha qoyska. Si ay maxkamadu u bixiso amarka EPOs waa inay xaqiijisaa in gacankahadal/qalalaase ay ka dhex dhacday qoyska, dhibanehuna uu sababeeyo in dhibaatadu ay sii socon karto iyo in dhibanaha iyo xubnaha kale ee qoyska ay u baahanyihiin ilaalin degdeg ah.

Waa in lagaa helaa mid kamid ah shuruudaha soo socda si marka hore laguugu aqoonsado inaad tahay “qof kamid ah qoyska” sida uu dhigayo sharcigu:

1. Inaad is qabtaan ama aad isqabi jirteen.
2. In aad tihiin ama aad ahaydeen dad qaangar ah oo isku tiirsan xiriirna ka dhaxeeyo.
3. Inuu idinka dhaxeeyo xiriir dhiig (wada dhalasho) , xiriir guur, ama soo korsasho
4. Inaad isla dagantihiin ama iskula daganaydeen adinkoo idinka dhaxeeyo xiriir dhow.
5. Aad waalid u wada tihiin hal ama kabadan caruur ah.
6. Aad tihiin caruur ay xanaaneeyaan dadka kor lagu soo xusay.
7. Aad isla dagantihiin/wadanooshihiin ayadoo midkiin uu haayo daryeelka ama xanaaneynta kan kale, ama uu maamulka uu haayo kan kale ayadoo la raacayo amarka Maxkamadeed.

*** dadka uu ka dhaxeeyo xiriir shukaansi oo aan waafaqsaneen mid kamid ah shuruudaha kor ku xusan, waxay codsan/dalban karaan amarka xakameynta (restraining order)***

FIIRO GAAR AH: Amarka Ilaalinta/badbaadada Degdega ah (EPOS) laguma bixiyo si toos xitaa hadii aad u qalantid inaa dalbatid. Sarkaalka garsoorka (A Justice) [horana loo dhihi jiray "Garsooraha Maxkamada Gobolka" (Provincial Court Judge)], ama Sarkaalka Garsoorka Nabada (a justice of the peace) , ee Maxkamada Cadaalada Alberta ayaa qiimeyn doona codsigaada oo go,aan ka gaaraya gabagabada dhageysiga dacwada in lagu siiyo Amarka Ilaalinta Degdega ah (EPO) iyo inkale.

Waxaad ku heli kartaa Amarka Ilaalinta Degdega ah adoo shakhsi ahaan u doonan kartid, ama inaa iimaylka ku dalbato ama adoo wacaysid taleefanka.

Qof/Shakhsi ahaan hadii aad u tagaysid waxaad tagaysaa:

Edmonton Law Courts, Family & Youth Clerks office (oo ku taala 1A Sir Winston Churchill Square)

Waxay furantahay : Isniin ilaa Jimce inta u dhaxaysa 8:15 a.m. ilaa 3:30 p.m.

Meesha markaa tagtid waxaa lagu tilmaami doona sida aad u buuxinayso waraaqda codsida Amarka Ilaalinta degdega ah (EPO) ayadoo uu kaa caawin doono qareen qaabilsan arimahaas oo bilaash ah. Inta aadan meesha tagin ama hadii aad suaalo qabtid, waxaad wici kartaa numberkaan (780) 422-4730).

Ama

Edmonton Law Courts (ka gal 99-street) *** Raac calaamadaha tusinaya xafiiska dacwad dhageysiga ee Edmonton *** oo furan Isniin ilaa Jimce inta u dhaxeysa 4:00 p.m. ilaa 11:00 p.m. AMA Sabti ilaa Axad inta u dhaxaysa 8:00 a.m. ilaa 11:00 p.m.

Waa inaad wacdid taleefan nambarka albaabka ku qoran, kadib qof kamida ilaalada meesha ayaa kusoo gelin doona. Waxaa meesha kajira nidaam amni sida in la isticmaalo qalabka waxyaabaha biraha ah baara.

Taleefoon ama iimayl hadaad kula xariiraysid:

*** Waa inaad haysataa aqoonsi sawir ku dhaganyahay, iimayl aad wax ka diri kartid iyo qaab aad u diri kartid dukumentiyada elektorooniga ah***

*** Hadii luuqada ingiriiska aysan ahayn luuqadaada koowaad ama aadan heysan waxyaabaha kor ku xusan, Booliiska ayaa isku dayi kara inay kuu dalbaan Amarka Ilaalinta Degdega ah (EPO) ayagoo adiga ku matalaya***

Waraaqaha codsiga waxaa qabta xafiiska dacwo dhageysiga maalmaha Isniin ilaa Jimce inta u dhaxaysa 4:00 p.m. iyo 8:00 a.m.

limaylkan ku dir Hearingoffice.Edmonton@just.gov.ab.ca inta u dhaxaysa saacadaha 4:00 p.m. iyo 11:00 p.m. ama Hearingoffice.Calgary@just.gov.ab.ca inta u dhaxaysa saacadaha 12:00 a.m. iyo 8:00 a.m.

Codsiyada waxaa kaloo lagu diri karaa xafiiska dhageysiga oo shaqeeya 24ka saacadood maalmaha Sabtida, Axada iyo maalmaha fasaxyada adoo ku diraysid iimaylkaan Hearingoffice.Calgary@just.gov.ab.ca.

Markii Codsigaada La Ansixiyo:

Markii codsigaada la ansixiyo, waxaad heleysaa nuqul ama koobi Amarka Ilaalinta/Badbaadada Degdega ah (EPO) iyo warbixin la xariirta caawimaada bilaashka ah ee laga helo qeybta qaabilsan caawimaada arimaha sharciga (Legal Aid's EPOP) oo ku qoran taariikhda dib u eegida ee Maxkamada sare (Court of King's Bench). Taariikhda dib u eegista waxay ku qornaan doontaa nuqulka Amarka Ilaalinta Degdega ah ee aad heli doonto. Hadii aad danaynaysid in Amarka Ilaalinta Degdega ah ay kuu sii socoto taariikhda dib u eegista kadib, waxaad u baahantahay inaad imaatid taariikh cayiman , ama aad soo gashid aaladaha la iska arko ama Taleefoon ahaan kusoo wactantid. Hadii aa rabtid:

- a. Alaad ahaan: Halkaan riix [here](#)
- b. Taleefoon ahaan ka wac 1-780-851-3573 – adoo ku galaysid #:187 045 7913
- c. Xafiiska dhageysida dacwada wuxuu kaloo u diraya Amarka ilaalinta Degdegaha ah (EPO) Booliiska Edmonton si uu ugu gudbiyo kajawaabaha (eedaysanaha) iyo wakiiladiisa.
- d. Waxaa si toos ah markiiba laguugu xilsaarayaa qareen kasocda qeybta caawimaada sharciyada (Legal Aid). La xariir taleefon leenka ah (780)

422-9222 adigoo u reebaya cod, sheegayana magacaaga, meesha lagaala soo xariiri karo iyo taariikhda dib u eegista aad leedahay.

Meelaha aad ka heli Karto Caawimaada

1. Alberta Council of Woman's Shelters

- a. Hadii aad u baahantahy inaa la hadasho qof meelaha guryaha badbaadada ee kuu dhow wac talefankan oo 24 saac ,7 beri shaqeeya, 1-866-331-3933 ama booqo boga interneetka [visit the webpage](#) si aad u ogaato guryaha badbaadada ee agagaarkaada kuyaala.

2. La xariir xarunta lagu magacaabo: Momentum Counselling Services, ka wac nambarkaan 780-757-0900 si aad u ogaato warbixnada latalinta dumarka iyo ragaba.

3. Wac Booliiska Edmonton qeybta qaabilsan adeegyada caawinta dhibanaha iyo ka caawinta Maxkamada (Edmonton Police Service Crime and Trauma Informed Support Services – Victim Support and Court Orientation) kana wac 780-421-2217 ama u dir iimayl ctss@edmontonpolice.ca si aad u heshid caawimaad.

4. Caawimaada dadka reer Alberta ee kasoo baxsanaya xadgudubyada:

- a. Dadka reer Alberta ee kujira xaalad xadgudub ama tacadi ah wuxuu heli karaa caawimaad 24/7 oo loo soo marsiinayo hey'ada (Alberta Works Fleeing Abuse Fund) adigoo wacaya 1-866-644-5135 oo aad bilaash ku waci kartid meelkastoo aad kajoogtid Alberta.

b. Xarunta (Today Family Violence Centre) waxay bixisaa meel amaan ah, ay u simanyihiin dhamaan dadka qaangaarka ah, jinsi kasta ooy yihiin, kuwaasoo dhibane u ah qalalaasaha/gacankahadakil qoyska si ay u helaan caawimad taasoo ah mid muuqato (practical), mid dareen (emotional), qarsoodi ah (confidential) oona bilaash ah.

Xarunta (The Today Family Violence Centre) kooxdeedu waxay isugu jiraan dad sifiican ugu takhasusay qalalaasaha ka dhex dhaca qoysaska kuwaasoo adiga iyo qoyskaadaba ka caawin karo inaad nabadgelyo heshaan. Xarunta waxaa kala xiriiri kartaa Taleefanka:780-455-6880 ama iimaylkan: info@thetodaycentre.ca

5. Macluumaadka la xiriira Xadgudub Galmo, Xadgubka dadka da'da ah, iyo Adeegyada ilmaha.

a. Xaruntaan (Alberta Association of Sexual Assault Services) la xariir - hadii aad tahay dhibane ay ku dhacdey xadgudub galmo aadna u baahantahay caawimaad ama gargaar . Wac ama fariin qoraal u dir taleefankan bilaashka ah (1-866-403-8000) oo shaqeeya 24 kasaac 7 da maalmoodba.

b. Xaruntan kale (Sexual Assault Centre (SACE) waxaa lagala xariiri karaa Taleefankaan : 780-423-4102. Waxay bixisaa adeegyo caawimaad oo khaas ah kuwaas oo bilaash ah.

c. Xaruntaan (Saffron Centre in Sherwood Park) waxaa lagala xariiri karaa Taleefankaan: 780-449-0900. Xaruntu waxay bixisaa adeegyo caawimaad ama adeegyo khaas ah taasoo lagu qiimeynayo dakhliga qofka soo gala.

d. Xadgudubka galmada ee dhaca waxaa loogu gudbin/sheegi karaa Booliiska Edmonton qaab oonleen ah, halkaan riix [here](#).

e. Waxii macluumaad ama warbixino kusaabsan tacadiga loo geysto dadka da'da ah ama waayeelkaa wac Taleefankaan 780-454-8888 oo shaqeeya 24 ka saac 7da maalmoodba. Waxii la xariira soo gudbin ama talosiin tacadiyada dadka da'da ah, wac taleefanka loogu talagalay ee (Elder Abuse Intake Line) saacadaha maalintii ah 780-477-2929.

f. Adeegyada carruurta (Children Services) waxay bixisaa xarun qaabilsan dhibaatooyinka dhaca (Crisis Unit) oo 24 saac ah, taasoo lagala xariiri karo Taleefanka: 780-422-2001 ama labmarkan kale ee bilaashka ah 1-800-638-0715.

6. Resolution Services waa xarun bixisa adeegyada ugu horeeya oo lagu caawinaayo dadka reer Alberta ee Maxkamadi usocoto iyo inay helaan macluumaad ka caawin kara inay xal u helaan arimaha sharciga laxariira.

Xaruntooda waxaa lagala xariiri karaa taleefankaan: 780-638-4747 ama kan bilaashka ah ee: 1-855-738-4747. Fadlan xasuusnow in xaruntaan (Resolution Services) inaysan bixinin:

- Talooyin la xariira sharciga
- Xal u helida dhibaatooyinka sharciga
- Caawimaada codsiyada sharciga ama talooyin ku saabsan waxa lagu qoro codsiyada Maxkamadaha.

7. Caawimaada Sharciyada

- a. Xarunta Legal Aid Alberta waxaad kala xariiri karaa 780-427-7575 ama booqo websaaytkooda www.legalaid.ab.ca (waa adeeg bilaash ah)
- b. Family Court Counselor , lataliye Maxkamadaha qoyska, waxaad kala xariiri karaa adoo wacaysid nambarkaan: 780-427-8343
- c. Diyaarinta Maxkamada (Court Preparation) – Barnaamijyada caawinta cabashooyinka la xariira qalalaasaha qoysaska (Domestic Violence Complainant Assistance Program) waxaad kala xariiri kartaa 780-422-0721

8. Kawaran Xayawaanada Rabaayadaha ah?

- a. Barnaamijka ilaalinta Xayawaanada Rabaayada ah (Pet Safekeeping Program) waxaa laga heli karaa taleefankaan: 780-447-3600 ext.3750 ama adoo iimayl u diraysid: aasap@albertaspca.org.

9. Guryaha/Deeganada La Kireysto (Residential Tenancies) (Xeerka waxka badalka in la helo meel amaan u ah dadka dhibanaha u ah qalalaaasaha/gacankahadaka ka dhaca guryaha)

- a. Hadii adiga iyo/ama carruurtaada aad qatar ugu jirtaan in dhibaato idin gaarto, waxaad jebin kartaa/kabixi kartaa heshiiska kirada ayadoo aysan kugu dhicin ganaax lacageed. Laxariir 310-000 ama 780-422-4080 si aad u hesho caawimaad.

10. Ilaalinta iyo Taagerada/Caawimaada

- a. Barnaamijka Dhaqangelinta Ilaalinta (The Maintenance Enforcement Program (MEP) wuxuu masuul ka yahay inuu dhaqangeliyo caawinta/masruufka ilmaha (Child Support) iyo amarada Lammaanaha (Spousal orders) ayagoo aruuriya/kaqaadaya lacagta, siinayana dadkii loogu talagalay. Waxaa lagala xariiri karaa xaruntaan(MEP) adoo wacaysid taleefankaan 780-422-5555.